

Somali | Soomaali

Mudanaha/Marwadada guriga degan,

RE: Guryaha cusub ee Bankasia Gardens, Broadmeadows

Homes Victoria waxay guryo bulsho oo cusub ka bixinaysaa Banksia Gardens, Broadmeadows.

Waxaan dhisaynaa ku dhawaad 120 guri oo casri ah, oo si wanaagsan loo nashqadeeyay, guryo bulsho oo korontada dhaqaaleynaya kuwaas oo ku yaal dhulka aan laga faa'iidaysanin ee kusii jeeda Waddada Colerain Street.

Inta hada ka badan \$80-ka milyan ee lagu maalgashaday waxaa si wadajir ah loo maalgeliyay iyada oo loo marayo Khasnadda Dardar-gelinta Guryeynta Bulshada ee Dowladda Barwaqaqoosoranka iyo Dhismaha Guriyeynta Weyn ee Dawladda Victoria.

Qorshaha guud ayaa sidoo kale la diyaarinaya kaas oo qeexaya himilada dib u cusboonaysiinta muddada dheer ee xaafadda weyn ee Banksia Gardens.

Dhismaha guryaha cusub ayaa la filayaa in la bilaabo bartamaha sanadka 2024-ka lana soo gaba gabeeyo 2026-ka. In ka badan 700 oo shaqo ayaa la filayaa in la abuuro inta lagu jiro marxaladda dhismaha.

Dadka degan Banksia Gardens waxaa lagu martiqaadaya inay ku soo biiraan **Kooxda Codka Dadka meesha degan (Resident Voice Group)** si ay usoo gudbiyaan ra'yigooda ku aadan qorshaha guud iyo naqshadeynata guryaha cusub. Habka Codsi soo Gudbinta (An expression of interest) hadda wuu furan yahay, arjiyadana waxaa laga buuxin karaa bogga Homes Victoria maalinta Isniinta ah 30-ka Oktoobar.

Si aad isugu diiwaan geliso wixii kusoo cusboonaado mashruuca, ama aad macluumaadka warqaddan aad ugu heli laheed qaab la heli karo ama la fasiray, fadlan noogu soo dir email **banksiagardens@homes.vic.gov.au** ama soo wac **1300 870 250**.

Iskaan garee/sawir koodka QR-ka si aad wax badan uga ogaato mashaariicda Banksia Gardens oo buuxi Codsi soo Gudbinta (An expression of interest) foomka si aad ugu biirto Kooxda Codka Dadka meesha degan.

Mahadsanid,



Simon Newport
Sarkaalka Fulinta
Homes Victoria
12 Oktoobar 2023

